

# HUBIYAH A ISKA BAARIDDA XANUUNKA EE MAALINLAHA AH

Shaqaalaha iyo waalidiinta/mas'uuliyiinta ardayda waxaa looga baahan doonaa inay iska baaraan maalin kasta astaamaha cudurka ka hor intaysan galin dhismaha degmada ama aysan isticmaalin gaadiidka degmada. Hubiyaha Is-baarista waa in loo adeegsadaa in lagu go'aamiyo haddii ay jirto halista jirro ama u-baylahsanaanta COVID-19. **Haddii shaqaalaha ama ardaygu leeyahay mid ka mid ah astaamahan soo socda ama uu u baylahay COVID-19 14-kii maalmood ee la soo dhaafay, waa inuu guriga joogaa oo u soo sheegaa maqnaanshahihiisa iyo astaamahiisa dugsiga ama kormeeraha ku habboon, lana xiriiraa bixiyahooda daryeelka caafimaad haddii loo baahdo.**

## Ka helidda/Ka ag dhawaansho/U baylahsanaanta suuragalka ah ee COVID-19 (14 maalmood ee la soo dhaafay)

- Shaqaale, arday, ama qof ka tirsan qoyskooda oo laga helay COVID-19
- Shaqaale ama arday ayaa ka ag dhawaaday (6 fuudh gudahood) qof qaba COVID-19 ugu yaraan muddo isugeyn 15 daqiico ah maalintii.
- Shaqaale ama arday ayaa uu ka codsaday inuu is gooniyeeyo ama isku karantiilo guriga xirfadle caafimaad ama waaxda caafimaadka bulshada ee deegaanka
- Shaqaale ama arday leh xubin reerka kamid ah oo ka ag dhawaaday (u jirsaday 6 fuudh qof cudurka qaba ugu yaraan muddo 15 daqiico ah) qof laga helay COVID-19, haatana uu xubinta reerku leeyahay astaamo jirro.

## Astaamaha Aasaasiga ah ee COVID-19

- Qandho (heerkulka 100.4°F ah ama ka sareeyya) ama qarqaryo
  - Qufac cusub oo aanuu baarin ama uusan ansixin bixiyaha daryeelka caafimaadku
  - Neef yari ama neefsashada oo adkaata oo aan la garanayn sababteeeda
  - Dhadhan ama ur lumin cusub
- ## Astaamaha Dheeraadka ah ee Ka Reebida Jirrada
- Matag
  - Shuban
  - Firiiric ama nabaro aan la aqoon



**PORLAND PUBLIC SCHOOLS**  
**REOPEN**